

Xeerka Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka lamba. 20Bis ee 13 Nofember 1969

Oggolanshaha Abaalgudka Loogu Tala Galay Wakiiladaha Degmooyinka ee Waaxda Xisabaadka ee Waaxda Guud ee Xisabaadka ee Wasiirka Maaliyaadda

**MADAXWEYNAHA
Golaha Sare ee Kacaanka**

Kadib markii la arkay Axdiga Kowaad ee Kacaanka 21 Oktoober 1969;
Kadib markii la arkay Dasturka qeybtiisa la jaan qaadi karta ahmiyadda Kacaanka;

Kadib markii la arkay Amar-sharci lamba. 8 ee 15 Maarso 1954;
Kadib markii la arkay go'aanka lamba. 0/329/69 ee 20 Agosto 1969;
Kadib markii la garowsaday baahida loo qabo in la qondeeyo gunno loogu tala galay Wakiiladda Degmooyinka ee Xisabaadka ee Waaxka Xisabaadka ee Wasaaradda Maaliyadda.

WAXAA LA SOO SAARAY

**Qod. 1
Gunno - Abaalgud**

Laga bilaabo 1da Janaayo 1969 waxaa loo ogolaaday gunno dhan Sh. So. 200 bil kasto oo loogu tala galay Wakiiladaha Degmooyinka ee Xisabaadka Xafiisyada Degmooyinka ee Waaxda Xisabaadka Guud ee Wasaaradda Maaliyadda.

Qod. 2

Laga bilaabo 1da Janaayo 1969 waxaa la buriyey wareegtada lamba. 6 ee 1958 oo ka jiray gobollada Burco iyo Hargeysa.

Qod. 3

Kharajka la xiriira waxaa laga soo qaadi doonaa madaxa13, cutubka 1.3.3 ee misaanayadda sanadka 1969 ee la xiriira iyo madaxyada kale ee sanadyada kale ee is xigxigga.

Qod. 4

Xeerkaan waxaa lagu daabici doona Faafinta Rasmiga ha ee Jamhuuriyadda Dimuqratiya ee Somaliya.

Muqdisho, 13 Nofember 1969.

Madaxweynaha
Golaha Sare ee Kacaanka
Sareeye Guuto Mohamed Siyad Barre

Xoghayaha Dowladda ee Maaliyadda
Mohamud Abdi Arraleh